fact sheet

Maxkamada Maamulka & Madaniga ee Victoria

Victorian Civil and Administrative Tribunal (Liiska Kireysiga ee Guryaha degaanada) wuxuu dhegeystaa muranka u dhaxeeya mulkiilaha iyo kireystayaasha. Ma aha maxkmad , laakiinse waxay awoodaa inay sameyso go'aamo sharci ahaan la fulin karo. Waxaa loogu talagalay inay ahaato mid aan toos ahayn oo raqiis ah iyo inay u xaliso muranka si dhakhsa ah oo cadaalad leh.

Codsiyada

Waxaad codsi u soo qoran kartaa Maxkamada haddii aad ku qabto dhibaato mulkiilahaaga aydaan xalin karin. Waxaa wanaagsan inaad isku daydo oo aad xaliso dhibkaaga ado la hadlaya mulkiilahaaga ama wakiilkiisa guriga kireeya ka hor intaadan soo codsan Maxkamada. Haddii aad go'aansato inaad dooneysid inaad codsatid, waa inaad tallo ka heshaa Tenants Union of Victoria.

Si aad u sameyso codsi, waxaad u baahan tahay inaad buuxiso foomka codsiga ee Maxkamada Maamulka iyo Madaniga ee Victoria, oo laga heli karo Maxkamada ama Ururka Kireystayaasha. Raac tilmaamaha ku qoran foomka. Waa inaad hubisaa meesha foomku kugu weydiinayo inaad magacowdid mulkiilaha, waxaad ku qoreysaa mulkiilaha magaciisa ma aha magaca wakiilkiisa guriga kireeya. Haddii mulkiiluhu yahy shirkad, waxaad ku dartaa CAN. Haddii mulkiiluhu yahay shirkad, waxaad ku dartaa CAN. Haddii aad tahay kireystaha guryaha dawlada, mulkiilahaagu wuxuu noqonayaa Agaasimaha Guriyeynta (Director of Housing).

Wakhtiga daabacaada, waxaa jira lacagta ujrada foomka Maxkmada oo dhan $35.20. waxaad ku bixin kartaa lacagtaan ujrada ah money order, jeeg ama credit card. Haddii aad dooneysid inaad lacag caddaan ah bixiso, waxaad u baahan doontaa inaad qof ahaan codsigaaga aad geyso Maxkamada. Haddii aadan awoodin lacagta ujrada ee codsiga waxaad weydiisan kartaa in lagaa daayo adoo buuxinaya foomka Codsiga ka Deynta Lacagta Ujrada ah. Haddii aadan hubin sida nidaamku u shaqeeyo, la xirriir ururka Kireystayaasha.

➲ Ma jirto wax lacag ujro ah oo codsi markaad soo dalbaneyso in laguu soo celiyo debaajigaaga.

Waa inaad u dirtaa nuqul ka codsigaaga mulkiilaha, iyadoo la doorbidayo inaad ku dirto warqad diiwaangashan oo saxiix u baahan marka la qaadanayo. Heyso risiitka warqada iyo nuqulkaaga codsigaba.

Ogeysiinta dhegeysiga Maxkamada

Waxaad heli doontaa ogeysiin Maxkamada oo kuu sheegaysa meesha iyo goorta uu ka dhacayo dhegeysiga Maxkamadu. Inta wakhti ah ee aad sugi doonto dhegeysigu wuxuu ku xirnaan doona nooca codsigaagu yahay sida Maxkamadu u mashquulsan tahay.

Haddii aadan awoodin inaad tagto Maxkamada maalinta dhegeysiga, waxaad u baahan tahay inaad tallo ka hesho Ururka Kireystayaasha oo ku saabsan codsiga in dib laguugu dhigo. Codsiga in dib laguugu dhigo waa in la sameeyaaa ugu yaraan 2 maalmood oo shaqo ka hor dhegeysiga maxkamada waana inay la socotaa dukumiinti codsigaaga (sida shahaadada dhakhtarka). Ma jirto ballan qaad in laguu ogolaan doono in dib laguugu dhigo, laakiinse waxaa jira fursad wanaagsan haddii mulkiilahaagu ogolaado.

➲ Haddii aad u baahan tahay turjumaan, waa inaad la xirriirtaa Maxkamada ka hor taariikhda dhegeysiga maxkamada si aad u ogeysiiso. Maxkamada waa inay kuu qabatgaa turjumaan, haddii kale waxaad weydiisan kartaa in dib laguugu dhigo.

Diyaarinta kiiskaaga

Markaad u sameysato codsi Maxkamada, masuul ayaad ka tahay inaad caddeyso kiiskaaga. Tan micnaheedu waxaa weeye waa inaad keentaa caddeyn taageereysa kiiskaaga. Nooca caddeynta ee loo baahan yahay waxay ku xirnaan doontaa xaalada. Eeg ***Jeegliska Dhegeysiga Maxkamada (Tribunal Hearing Checklist)*** wixii tallo ah eek u saabsan nooca caddeynta ee aad keenayso dhegeysiga, ama la xirriir Ururka Kireystayaasha wixii tallo ah.

Dhegeysiga ka hor, waa inaad nuqulo ka soo sameysaa wixii waraaqo ah ama dukumiinti ee aad dooneysid inay aragto maxkamadu, soona habeyso wixii markhaati ah inay yimaadaan Maxkamada maalintaas dhegeysiga. Maxkamadu dib uma dhigi doonto kiiskaaga sababtoo ah inaadan markhaatiyaal heysan ama dukumiinti, mana sameyn doonaan wax taleefano ah si ay u caddeeyaan waxaad ku doodadeyso.

Eeg bogga kale...

TENANTS UNION of Victoria Ltd

Waxaa wanaagsan inuu qof caddeyn bixiyo shakhsi ahaan meeshii aad isku halayn lahayn warqad ama warqad dhaar ah oo qof soo qoray. Haddii markhaatigu diido inuu yimaado dhegeysiga maxkamada oo aad rumeysan tahay in caddeyntoodu ay muhiim tahay waxaad weydiin kartaa maxkamadu inay u dirto uyeeritaan markhaatiyeed. Waa inaad dalbataa uyeerida ka hor taariikhda maxkamada. Tani waa si qof ku iman karo dhegeysiga maxkamada oo uu caddeyn u dhiibi karo. Haddii kale markhaatiga waxay ku dhiibi karaan caddeyntooda warqada dhaarta ah (oo laga helo goobaha warqeysyada badidooda).

➲ Si aad isugu diyaariso dhegeysiga maxkamada, waxaad sameysaa qoraal gaaban oo dul maraya waxaad dooneysid inaad tiraahdid, oo uu ku jiro liis dukumiintiyo ah oo aad dooneysid inaad tusto Maxkamada. Inaad isa soo habeyso waa furaha ugu muhiimsn ee aad ku dhiiban karto kiis wanaagsan.

Metelaad

Guud ahaan, dhinac kasta waxaa looga baahan yahay inay ka soo jeediyaan kiiskeeda Maxkamada. Si kastaba ha ahaatee waxaa kumeteli kara u doode aqoon leh (sida shaqaalaha kireystayaasha) marka:

> mulkiiluhu isku deyayo inuu guriga kaa saaro

> mulkiiluhu uu yahay u doode aqoon leh

> mulkiilaha uu matelayo u doode aqoon leh

> Maxkamadu waxay kuu ogolaaneysaa in sharci ahaan lagu metelo

Haddii aad rumeysan tahay inaad u baahan doonto in lagu metelo, waa inaad la xirriirtaa Ururuka Kireystayaasha isla markaad hesho Ogeysiinta Dhegerysiga Maxkamada. Waxaad sidoo kale weydiisan kartaa tallo iyo weliba inuu ku metelo sharci yaqaanka heeganka ku ah Maxkamada.

Dhegeysiga

hubi inaad Maxkamada timaado wakhtigii loogu talagalay, haddii aad soo daahdo, dhegeysiga maxkamadu wuu soconayaa adiga la'aantaa saa daraadeed qorshee inaad timaado ugu yaraan 15 daqiiqo wakhtiga dhegeysiga maxkamada.

Ka dib markaad u sheegto shaqaalaha miiska soo dhaweynta inaad timid, waxaa lagaa yeeri doona qolka dhegeysiga maxkamada. 'Xubinta' (qofka go'aamin doona kiiskaaga) ayaa ku weydiin doona adiga iyo mulkiilaha ama wakiilka inaad ku dhaarataan Kitaabka ama inaad caddeyso inaad run sheegi doonto.

Sida loo dhegeysanayo kiiskaaga waxay ku xirnaan doontaa Xubinta gaarka ah ee dhegeysanaysa kiiskaaga, si kastaba ha ahaatee, badanaa qofka codsiga sameeyey ayaa la weydiin doona marka hore inay kiiskooda soo jeediyaan.

➲ Weligaa ha xanaaqin. Murankaagu ha caddaado qodobkana ha abaaro isku day inuusan ku baqdin gelin mulkiiluhu ama wakiilkiisu am Xubinta Maxkamadu. Hubi in lagu siiyey fursada ah inaad kaga hadasho wax kasta oo aad rumeysan tahay inuu khuseeyo kiiskaaga ka hor intaysan Xubintu go'aanka gaarin.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan sidii aad u diyaarin lahayd dhegeysiga Maxkamadaada eeg Qalabka DVD ee ' Maalintii Miiska' ***('A Day at the Bench' DVD Kit)*** ama ***Tribunal Hearing Checklist***, oo laga heli karo Ururka Kireystayaasha.

Amarada

Ka dib markuu dhegeysto labadiinaba adiga iyo mulkiilaha ama wakiilkiisa, Xubinta Maxkamadu waxay sameyn doontaa 'amar' weydii Xubinta inay kuugu sharaxdo si tartiib ah. Waxaa laguu soo diri doonaa nuqul qoraal ah oo ah amarka laba toddobaad ka dib maalinta dhegeysiga maxkamada. Waxaad weydiin kartaa Xubinta inay ku siiso sababo qoraal ah oo ku saabsan go'aankooda, laakiinse waa inaad weydiisataa tan bilowga dhegeysiga maxkamad.

Haddii aadan ku faraxsaneyn go'aanka ay Maxakamdu gaadhay, waxaad qaadan kartaa racfaan laakiinse xaallado xaddidan oo kaliya. Waa in la sameeyaa racfaano Maxkamada Sare tanina waxay noqon kartaa mid aad qaali u ah. Waa inaad xareysaa racfaankaaga 28 maalmood gudahood laga bilaabo maalinta amarka. Haddii aad dooneysid inaad racfaan qaadato, waa inaad tallo ka heshaa Ururka Kireystayaasha sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogalka ah.

Victorian Civil and Administrative Tribunal
55 King Street Melbourne 3000
☎ (03) 9628 9800
☎ 1800 133 055 (freecall)
fax (03) 9628 9822

waxay furan tahy 9.00gh ilaa 4.30gd Isniin ilaa Jimce

Wixii macluumaad dheeraad ah taleefan u dir Khadka Tallada Ururka Kireystayaasha (Tenants Union Advice Line) ☎ (03) 9416 2577.

fact sheet

Macluumaadkan waa tuse ahaan oo kaliya waana inaan loo isticmaalin wax kuu bedela tallada sharciga ee aqoonta leh.
Tenants Union of Victoria Ltd ACN 081 348 227 **February 2009** www.tuv.org.au

TENANTS UNION of Victoria Ltd